



**UN-HABITAT**


**Barnaamijka Degsiimada Aadamaha  
ee Qarammada Midoobay**

Tusahaa Tababaraha ee Tababaridda Saraakiisha la Doorto

**Taxanaha  
Tababarka**



**Komishanka  
Yurub**



# **Tusaha Tababaraha ee Tababaridda Saraakiisha la Doorto**

**Wehelka Taxanaha  
Tababarka ee Hoggaanka  
la soo Doorto**

**Xarunta  
QM ee Degsiimada  
Aadanaha (Habitat)**

# **Tusaha Xubnaha Degaanka ee Adeegsiga Barashada**

## **Wehelka Taxanaha Tababarka ee Hoggaanka la soo doorto**

**Tarjumaddii: Akaademiga Nabadda iyo Horumarka (APD)**

**Istanbul, 1996kii-“Shir Madaxeedkii Caasimadaha”**

**Sawirrada waxa iska leh Joel Elrod,  
Naqshadaha iyo jaan-goynta na Vicki Gillette**

**Tusaha Xubnaha  
Degaanka ee  
Adeegsiga  
barashada**

**Taxanaha  
Agabka Tababarka**

**HS/719/04SO**

## HORDHAC

Mar ay Xarunta Degsiimada Aadanaha ee Qarammada Midoobay (Habitat) ay samaysay qiimayn ku saabsan baahida tababarka, waxa caddaatay in baahida loo qabo tababarka saraakiisha Dawladda Hoose ee la soo doorto, Maayarrada, iyo siyaasiyiinta bulshada ee kale, ay ka mid tahay waxyaalaha dunidu aadka ugu baahan tahay, halkaas oo ah ilaa imika meelaha ugu hooseeya xagga awood kobcinta khusaysa horumarinta bulshada iyo maamulka Dawladda Hoose.

Tiro dalal kala duwan ah, sida Nepal, Poland, Uganda iyo Paraguay ayaa guda-galay markii u horraysay muddo tobannaan sanno laga joogo, ama markii uguba horaysay waligoodba, habkii ay ku dooranayeen xubnihii golayaasha iyo Maayarrada. Dalal kale oo leh hab dimuqraadiya oo lagu doorto xubnaha Dawladda Hoose sida Ecuador, India, Belgium iyo Maraykanka waxa ajendahooda xagga sare kaga jira baahiyaha tababarka ee saraakiisha Dawladda Hoose loo soo doorto.

Iyadoo markaa la fulinayo baahiyahan, ayay Xarunta Qarammada Midoobay ee Degsiimada Aadanaha (Habitat) ay diyaarisay oo baadhis ku samaysay taxane tilmaame-bare oo tababarka ku saabsan ah, si ay uga caawiyaan xubnaha Golaha sidii ay u meteli lahaayeen dadka, bulshadana u hoggaamin lahaayeen, si tayo lehna ula shaqayn lahaayeen Dawladda Dhexe iyo maamulka, shaqaalaha farsamada iyo xirfadlayda joogta maamulka Dawladda Hoose iyo ururrada bulshada ee kale. Tilmaame-barayaashani waxay ka hadlayaan siyaasadda, go'aan-qaadashada, xidhiidhka, wada-hadalka iyo hogaaminta, ka qaybgalka, maamulka iyo qabashada shirarka, sidii Xubinta Goluhu wax u suuro-gelin lahayd una sahli lahayd, maamulka lacagta iyo baahiyaha kale ee la xidhiidha.

Taxanahan lagu tababarayo hoggaanka la soo doorto, oo markii u horraysay la daabacay sanadkii 1996kii markii la qabtay shirkii labaad ee (Habitat) ayaa xubnaha ururka UNCHS ay buugaggaa tarjumeen oo beddeleen, iyada oo lagu qoray in ka badan (12) af, waxana loo isticmaalay taxanaha sidii loo tababari lahaa kumaan kun saraakiisha Dawladaha Hoose ee la soo doorto ah ee jooga Africa, Asia, America iyo Europe. In kastoo tirooyinkaasi wax weyn muujinayaan, haddana weli waa dhibic ka mid ah baahida tababarka ee badda ah, waana bilowgii olole caalamka oo dhan khuseeya.

Iyadoo la eegayo baadhitaankan khibradeed isla markaana la fulinayo baahida tababarayaasha iyo ka qayb galayaasha fadhiyadan waxbarasho, waxa ay xaruntani immika soo saaraysaa buuggii “ku hagayay Xubinta Goluhu sidii uu u fulin lahaa wuxu bartay” kan oo kaalinaya taxanaha tababarka hoggaanka la soo doorto. Wuxu buuggani ka kooban yahay waxyaalo la akhrisanayo, tilmaamo, foomam loogu talo galay inay sahlaan habka waxbarashada iyo inay caawiyaan isticmaalka aqoonta iyo xirfadaha cusub oo aadna kor ugu qaadaan raadka tababarku ku yeelanayo horumarinta adeegga Xubnaha Golaha iyo hoggaamiyayaasha kale ee bulshada.

Waxa kale oo la rajaynayaa in buuggani si dheeraad ah u xoojin doono tayada Dawladaha Hoose isaga oo bandhigaya adeegyo hoggaan oo fiican oo ah mid ka mid ah ujeedooyinka waawayn ee ololaha caalamiga ah ee Hay'adda UNCHS ay ka leedahay xukunka

**Tusaha Xubnaha  
Degaanka ee  
Adeegsiga  
barashada**

**Taxanaha  
Agabka Tababarka**

magaalooyinka.

Waxa aan jeclahay in aan halkan ugu mahad naqo Dr. Fred Fisher iyo Mr. David W. Tees diyaarinta ay buuggan iyo qaar kale oo taxanahan ka mid ah diyaariyeen iyaga oo uu kala qayb qaatay Dr. Tomas Sudra oo ka tirsan Hay'ada UNCHS (Habitat) qaybta tababarka iyo kobicinta. Diyaarinta iyo daabacaadda taxanahan waxaa gacan ka geysatay xukuumadda Netherlands tan oo qayb ka ahayd barnaamijka Xarunta ee tababarka hoggaanka iyo maamulka Dawladda Hoose. Waxa aan jeclahay oo kale in aan u mahad naqo qaybta ay ka qaateen tababarayaasha iyo saraakiisha Dawladaha Hoose ee dalalka Colombia, Costa Rica, Ecuador, El Salvador, Hungary, India, Kenya, Latvia, Lithuania, Namibia Nepal, Pakistan, Poland, Romania, Slovakia, South Africa, Tanzania, Uganda, Zambia, iyo dalal kale oo dhawr ah oo naga taageeray tijaabo goobeedkii lagu sameeyay qalabka tababarka.

Dr. Klaus Topfer

Kaaliyaha Xoghayaha Guud iyo Ku-simaha

Agaasimaha Fulinta ee UNCHS ( Habitat)

**Tusaha Xubnaha  
Degaanka ee  
Adeegsiga  
barashada**

**Taxanaha  
Agabka Tababarka**

## AQOONSI

Tarjumadda iyo habaynta af Soomaaliga ah ee Tilmaame-barayaasha Hoggaanka la soo doortay waxay ku hirgashay Barnaamajka Is-maamulka Fiican iyo Tababarka Hoggaanka la soo doortay ee ay maal-gelisay EU-du, isla markaana uu fuliyay Xafiis Goboleedka UN-HABITAT ee Afrika iyo Dalalka Carbeed.

Tarjumadda iyo habaynta af Soomaaliga ah ee Tilmaame-barayaashan Tababarka Hoggaanka la soo doortay, waxa ka hawl-galay koox tarjumadda ku xeel dheer oo ka tirsan: Akaademiga Nabadda iyo Horumarka, Jaamicadda Hargeysa iyo Jaamicadda Cammuud; iyaga oo ay ka caawisay Hay'adda QM ee HABITAT, laanteeda Hargeysa ku taal.

Mahad-naq gaar ah waxa mudan Akaademiga Nabadda iyo Horumarka oo ka hawl-gashay tifaf-tirka iyo isu-ekeysinta Tilmaame-barayaashan.

Waxa kale oo mahad-naq mudan Jacfar Maxamed Gaaddaweyne oo Akaademiga Nabadda iyo Horumarka ee Somaliland ka tirsan, Maxamed Muumin oo Jaamicadda Bariga Afrika ee Puntland ka tirsan iyo Maxamed Afrax oo Xarunta Cilmi-baadhista iyo Dood-wadaagga ee Koonfurta-Dhexe ee Soomaaliya ka tirsan, kuwaas oo wada diyaariyay tarjumadda ereyada Ingiriisiga ah ee Tilmaame-barayaashan ku jira.

Mahad-naq gaar ah waxa isna mudan Maciej Sudra oo diyaariyay astaamaha iyo naqshadaha jaldiyada Tilmaame-barayaashan.

**Tusaha Xubnaha  
Degaanka ee  
Adeegsiga  
barashada**

**Taxanaha  
Agabka Tababarka**

# HALKA UU KAGA JIRO TILMAAME-BARAHAN

Hordhac	iii
Tusmada Tilmaame-baraha	v
Sida loo adeegsanayo Tilmaame-barahan	vii
<b>Qaybta 1aad.</b>	
Qormo: Xubinta Golaha iyo fulinta wixii la baray	1
Qeexid	3
Soo-ururin	3
Maxaad u danaynaysaa fulinta wixii la soo bartay	3
Tababarka Xubinta golaha: Arrin mudnaantiisa leh	4
Tusaalaha gudbin waxbarasho oo lagu guulaystay	5
Tusaalaha gudbin waxbarasho oo aan lagu guulaysan	6
Milicsi	8
Caqabadaha adeegsiga barashada	8
Qaadista Caqabadaha	9
Milicsi	10
Qorshaynta gudbinta waxbarashada	12
Aqoon-is-weydaarsi horaad: Qiimaynta diyaar-garowga	15
Aqoon-is-weydaarsiga gudihiisa: Qorshaynta adeegsiga wixii la bartay	15
Aqoon-is-weydaarsi dambeed: Adeegsiga xirfadaha cusub	19
Milicsi	21
Fikradaha gadaal-khaladka ah	22
<b>Qaybta 2aad: Buug-hawleed: Xubinta Golaha iyo adeegsiga</b>	
wixii la baray	25
<b>Xubinta 1aad:</b> Qoraalka Tababaraha	28
Waydiimaha qiimayneed ee hawl-galka qofeed	30
Tilmaamo	31
<b>Xubinta 2aad:</b> Qoraalka Tababaraha	34
Waxbarashada iyo qorshaynta ka qayb-galaha	35
Qoraalada waxbarashada ee aqoon-is-weydaarsiga	36
Qorshaynta iyo Tababarka asaaggaa	39
Qoraalo war celin ah	40
Qorshaynta adeegsiga waxbarashada	42
<b>Xubinta 3aad:</b>	46
Socodka adeegsiga waxbarashada	47
Qoraalo ku saabsan sida adeegsiga waxbarashadu u socdo	48
Raad-raac	52

**Tusaha Xubnaha  
Degaanka ee  
Adeegsiga  
barashada**

**Taxanaha  
Agabka Tababarka**

**Tusaha Xubnaha  
Degaanka ee  
Adeegsiga  
barashada**

**Taxanaha  
Agabka Tababarka**



## Sidee loo isticmaalayaa buuggan Tilmaame-baraha ah?

Tilmaame-barahani wuxu ka kooban yahay waxyaabo la isticmaalayo xilliyada loo diyaar-garoobayo ama lagu-gudo jiro ama ka dambeeya fadhiyada waxbarasho ee taxanaha tababarka madaxda la soo doortay; waxaana loo dejiyay hab kugu caawinaya si aad u fikirto una qorshayso sidii aad ugu soo biirin lahayd cilmi iyo farsamooyin cusub shaqadaada mas'uuliyadeed ee Dawladda Hoose.

Buuggani wuxuu ka kooban yahay laba qaybood:

**Xubinta 1aad:** Waa qoraal looga jeedo sidii aad naftaada wax u bari lahayd, waxa keliya ee aad u baahan tahay waxa weeye meel deggan oo aad ku fikirto, waqti iyo wax aad wax ku qorto. Si aad natiijo wanaagsan u hesho waxaanu kugu dhiirrinaynaa inaad qorto jawaabahaaga ku saabsan su'aalaha qoraalkan ee marba marka ka dambeysa lagu waydiinayo. Waxbarashada qofku waxay laban-laabmaysaa haddii qofku tani uu fuliyo.

**Xubinta 2aad:** Waa Buug shaqo oo ka kooban su'aalo iyo waraaqo shaqo fulin ah oo la rabo in qofku buuxiyo inta lagu jiro iyo marka la gebagebeeyo mid kasta oo ka mid ah fadhiyada wax barashada ee ku saabsan tababarka hoggaamiyaha la soo doorto. Waxaana lagu siinayaa waraaqihii shaqada ee dhabta ahaa si loogu buuxiyo tusaalooyin sharraxaya sida waxyaalahan loo isticmaalayo, si qofka ay aad ugu faa'iidayso inta uu ku jiro waxbarashada iyo ka-dib ba. Buugga shaqaduna saddex qaybood ayuu ka kooban yahay.

1. Agabka Xubinta 1aad waxay kaa taageerayaan sidii aad arrimahaaga ugu dhigi lahayd qaabka ay u kala mudan yihiin, waa marka “fadhiyadan madaxa la soo doortay lagu tababarayo” aad ka qayb qaadanayso iyo inaad qeexdo meelaha aad cilmi iyo farsamo ka faa'iidayso.
2. Agabka Xubinta 2aad waxay ku siinayaan qaab habaysan oo aad u daba gasho waxyaabaha aad ka faa'iidaystay intii fadhiyadu socdeen, kuwaas oo aad is-leedahay is-beddel macno leh ayay ku samaynayaan waxqabadkaaga iyo ka Golahaagaba.
3. Agabka Xubinta 3aadna waxa ay adiga ku kaalinayaan fadhiga waxbarasho dabadii si aad ballamadaadii(tababarkaagii) u fuliso oo aad waxqabadkaaga hoggaan (maamul) u hore mariso, iskana dhawrto dib u gurasho( sida inaad caadooyinkii hore dib ugu noqoto adoo iska diidaya dhibaataada ay leedahay fulinta waxyaalaha cusub ee aanad hore u aqoon).

Xilliba xilliga ka danbeeya waxaad arki cinwaanno ku suntan Qoraalka Tababaraha, kuwaas oo ay tahay in aad akhrido. Waxa looga jeedaa in dadka tababarka bixinayaa isticmaalaan si ay adiga kuugu suurto geliyaan inaad sida ugu wanaagsan u isticmaasho waxa aad baratay marka aad ku laabato Golihii aad xubinta ka ahayd.

**Tusaha Xubnaha  
Degaanka ee  
Adeegsiga  
barashada**

**Taxanaha  
Agabka Tababarka**

## **Qaybta 1aad: Qormo:**

**Tusaha Xubnaha  
Degaanka ee  
Adeegsiga  
barashada**

# **Xubinta Golaha iyo fulinta wixii la baray**

**Taxanaha  
Agabka Tababarka**

**Tusaha Xubnaha  
Degaanka ee  
Adeegsiga  
barashada**

**Taxanaha  
Agabka Tababarka**

## **Qeexid:**

Fulin: waa ku dhaqaaq iyo isticmaalid. Marka la eego tababarkan xubnaha golayaasha fulintu waxa weeye iyada oo si fiiro iyo kasid ah loo fuliyo farsamooyinkii lagu soo bartay “ fadhiiyadii hogaanka la soo doortay lagu tababarayay” si xubnuhu ay hore ugu mariyaan una hagaajiyaan adeegooda.

## **Soo-ururin:**

Waxaa loogu tala galay in buugan tilmaame-baraha ah ku siiyo macluumaad(war) iyo waxyaalo kaa taageeraaya sidii aad si midha dhal leh u isticmaali lahayd uguna faa’iidaysan lahayd fadhiiyadan aad adiga oo xubin gole ah aad ka qayb qaadanayso, ee kala duduwan, kuna saabsan hogaanka la soo doortay. Haddii aad khibrad u leedahay fadhiiyada waxbarasho waad ka war qabtaa in arimo badani hortaaganyihiin sidii uu qofku waxyaalihii uu soo bartay uga dhigi lahaa wax ka hirgala goobta uu ka shaqeeyo. Mana lihin imika dhammaan arimahaa iskaa hortaagaya waad tir-tiri kartaa. Hase yeeshee waxa aanu aragnaa in wax badan aad ka qaban karto inta aad ku jirto tababarkan iyo marka aad farsamooyin cusub soo fahamtaba. Tan oo kugu dhiirinaysa inaad fuliso si shaqadu u hagaagto. Waxa kale oo aanu rumaysanahay in fulinta wanaagsan ee waxa la bartay ka rabto fiirsasho iyo ku dhac ka qayb-galayaasha fadhigan waxbarasho iyaga oo ay taageerayaan macallimiintoodu iyo waliba dhigooda kala qaybqaadanaya tababarka oo marka tababarku dhamaado ay goobta shaqadu kulminayso.

## **Maxaad u danaynaysaa fulinta wixii la soo bartay**

Tababarku waa istraatiijiyadda caalamka dhammaantii laga qaatay ee shaqaalaha lagu horumariyo.hase yeeshee tababrku waa qaali. Mrkaa waxa ay dawlada hoose yeeleen, si’ay udhawraan una xoojiyaan xoogooda shaqaale ee ballaadhan, ina ay wax badan ku bixiyaan fadhiiyada waxbarasho ee rasmiga ah. Waxana la habsanayaa qiimaha wanaagsan ee lacagta lagu bixiyay tababarka marka la helo:

- 1- in tababarkaasi uu ku saabsan yahay baahiyo dhab ah oo ku saabsan xagga adeega iyo farsamda
- 2- in tababarkaa si hufan oo karti leh loo qorsheeyay, ay fulinayaana tababrayaal khibrad lihi
- 3- in ka qayb-galayaasha tababarku (dadka la tababaray) ay fuliyaan cilmiga iyo farsamda ay tababarka ku qaateen si adeegooda shaqo ay u horumariyaan. Waxaa la sheegay oo dhan waa in la helaa si tababarku u dhabeeyo himilooyimkii cidda maal galisay. Waliba waxa ugu muhiimsan arimahaa la sheegay arinka sadexaad, isagaana u dhib badan. Maxaa yeelay tababarka wanaagsan ee taabanaya baahida dhabta ah ee sida fiican loo qorsheeyay loona qabatay waxba tari maayo haddii kuwii la tababarayay aanay awood ku bixin sidii ay uga faa’iidayn lahaayeen isticmaalka waxay barten si ay u hagaajiyaan wixii ay baahiyo tabanayeen una badalaan dhaqankoodii.

Waxa soo kordhaya maanta in la fahmo in uu faraq u dhexeeyo wixii tababarka laga rabay iyo waxa natiijadu dhab ahaan ku danbayso. Cilmi baadhayaashu waxa ay ogaadeen in tababaro badan oo shirkadaha loo qabtay oo ku saabsanaa in xirfada shaqaalaha la horo

**Tusaha Xubnaha  
Degaanka ee  
Adeegsiga  
barashada**

**Taxanaha  
Agabka Tababarka**

mariyo korna loo qaado aanay keenin adeeg-kor-uqaad. Sanadadii sideetamadii(1980) labada cilmi baadhe ee (Timothy Baldwin) iyo (Kevin ford) ayaa sameeyay baadhis ballaadhan oo ku saabsan sidii tababrka la qaato (la barto) loo hir galin lahaa loogana fulin lahaa goobta shaqada. Waxa buug cilmi baadhistoodaa ka mid ah ku xusnaa in barnaamijyadii tababarka lagu soo qaatay 40% kaliya laga fuliyo goobta shaqada markiiba tababarka ka dib.

Waxaa iyana la yaab lahayd in 25% oo tababarkaa ihina ay fulaan lix bilood (Tababarka ka dib). Waxa ay fulinta 15% qaadataa ilaa sanad tababarkii ka dib<sup>1</sup>. Tani waxa ay innoo caddaynaysaa in shirkadaha iyo Ururada ay dawlada hoose ku jiraan ku bixiyaan lacag badan sanad kasta tababaro aan si buuxda goobta shaqada uga dhaqan galin.

Haddaba wuxuu Buuggani ujeedaa sidii uu wax u tari lahaa dadka tababarayaasha ah iyo kuwa la tababarayaba una dejin lahaa fadhiyo waxbarasho oo ku saabsan hogaanka la soo doortay, kuwaas oo si wanaagsan loo qorsheeyay loona bixinayo si natiijadu aad ugu fiicnaato tababaradaa aynu kor ku soo sheegnay dhinaca adeegga qofka iyo dhinaca hogaanka xubnaha golaha.

## **Tababarka xubinta golaha: Arrin mudnaantiisa leh**

Waxa aan caqli gal ahayn inaynu malaysano in tababarka hogaanka la doortay uu ka badbaadayo mushkiladii la xidhiidhaysay fulinta wixii la bartay, sida haysata tababarada nooc kastaba. Laakiin maxaa dhinac walba waxyeello iyo waxtar ka iman kara, si aad si buuxda u isticmaasho wixii aad soo baratay ee la xidhiidhay hogaanka la doortay si tayada golahaaga aad ugu horumarisid.

Dhinaca san haddaynu eegno waxa kaa galay tababrka waqti iyo lacag. Barnaamijka lagu tababarayo hogaanka la soo doortayna si wanaagsan ayaa loo qorsheeyay halka fadhiga aad ka qayb qaadatayna si dhamaystiran oo fir fircoon loo soo agaasimay. Waxaanu qiimaha waxa aad baratay soo baxayaa marka aad golahaaga wax soo saarkiisa kor uqaaddo aanu noqdo mid dhego u yeesha kana faa'iidaysta cilmigii la soo bartay. Waxana aad ogtahay in xoolaha dawladda hoose ka galay tababarkaagu uu qiimo yeelanaayo kolba inta aad ka dhabayso wixii aad baratay fulinteeda horena u mariso adeegga goobaha kala duwan ee lagu soo doortay.

Dhinaca kale hadii aynu ka eegno, fadhigii wax barashadu wuu dhamaaday oo shaqadaadii ayaad ku laabatay waxaana wali ku hortaagan dhibaatooyinkii horeba goobta shaqada uga jiray tababarka ka hor. Waxaa laga yaabaa inaad tidhaa ((Balo ma jirto)) (( Tababarkani wuu wanaagsanyahay waxa aanan bilaabayaa fulintiisa si aan u noqdo xubin gole oo suuban ))). Run ahaantii niyaddu waa mid aad u muhiim ah, hase yeeshee caadooyinkii hore aad ayay u xoog badan yihiin, habka cusub fulintiisuna waqti iyo sabir iyo isku kalsooni ayay u baahantahay.

Toddobaadka u horreeya ee aad tababarka ka soo laabato waxaa laga yaabaa inaad ka qayb gasho shir saraakiisha iyo bulshadu lahaayeen muddo bilo ah oo aan midho dhalin kuna saabsanaa sidii loo horumarin lahaa goob goobaha bulshada ka mid ah oo ah meel aad u xun. Adiga oo markaa gashanaya koofiyaddii macallinkaaga ayaad soo jeedinaysaa hab

**Tusaha Xubnaha  
Degaanka ee  
Adeegsiga  
barashada**

**Taxanaha  
Agabka Tababarka**

dhib yar oo mushkiladda lagu xaliyo si ay kooxdii shirku halkii uga dhaqaaqaan.

Marka taladaasi shaqayso, kartidaada aad kooxdaa xiiqsanayd wax ugu qabatay waxa ay si toos ah uga timid wixii aad soo baratay ee ku saabsanaa kaalinta xubinta golaha oo ah “ Fududayn”.

Bal ka waran haddii taladii shaqayn waydo? Waxaa laga yaabaa in awooddaada la illaabo, waxaana laga yaabaa in laga maadsado habkaa aad soo jeedisay oo u eg

mid dhaqan ahaan kaa fog ama aan ku habboonayn qofka haya xil mudane la soo doortay. Haddii taasi dhacdo waxa aad gaadhay meel xasaasi ah oo la xidhiidha habkii wax barashada . markaa ama taadaa ayaad wadan adoo fulinaya dhaqanka xubinta golaha ee cusub, adoo ka rajo qaba in waqti ka dib taadu ka xoog badan doonto dhibaatooyinka hadda ku horyaal. Ama faraha ayaad ka qaadi fulinta wixii aad soo baratay adiga oo odhanaya wallaahi arinkaasi mid fiican oo qiimo leh ayuu ahaa , hase yeeshee halkan kama shaqaynayo.

Waqtiba waqtiga ka dambeeya waxa uu qoraalkani ku siinayaa fursad, si aad ugu noqoto wixii aad soo akhriday una qorato xusuuso aad kaga jawaabayso su’aalaha aannu ku soo hordhigayno si aad uga fikirto. Waxa aanad halkan hoose ku arki fursad taas oo kale ah. Intaa ka hor si aad si qoto dheer ula jaanqaaddo fikradda ku saabsan fulinta wixii aad baratay.

Labada xaaladood ee soo socda, midi waxay sharrax ka bixinaysaa xubin gole oo leh khibrad naajix ah waxana “ ay” ama “uu” ku fulinayaa golihiiisa fikrad uu ka helay fadhigii lagu tababarayay hogaanka la soo doortay.

Ta kalena waa khibrad aan naajix ahayn oo tusaysa xubin gole oo iska tuurtay kana tagtay fulinta tababarkii.

Marka aad akhrido labada xaaladood ka faa’iidayso si aad tababarkii dib ugu daymooto inta aanad hawshaadan (( Akhriiga)) halkaa ka wadin.

**Tusaha Xubnaha  
Degaanka ee  
Adeegsiga  
barashada**

### **Tusaalaha gudbin waxbarasho oo lagu guulaystay.**

Xubinta golaha ee “A” ayaa ka qayb qaadatay fadhi wax barasho oo ka mid ahaa taxanihii tababarka hogaanka la soo doortay ee ay bixinayso hay’adda UNCHS kuna saabsanaa (( xubin gole oo wax suurto galinaysa )).

Mar uu tababaruhu wax sheegayay ayaa xubintii “A” fikrad ka qaadatay arin uu tababaruhu sheegay oo ahaa (( inkasta oo aad loo fahamsanyahay in dawladda hoose ka masuul yihiin bixinta qalabka iyo adeegga bulshada, haddana maaha qasab inay si toos ah waxyaalaha bixintooda gacanta ugula jiraan)).

**Taxanaha  
Agabka Tababarka**

Xubinta “A” waligeed kumay fikirin in adeegga guud wakaalad ama urur kale bixin karo. Markaa goortii ay jaleecday odhaahdii, waxa ku soo dhacay in dad yar – haddii ay jiraanba – waafaqsanyihiin fikradda ah dawladda shaqadeedu waa inay doonida shooqaanta u hayso ee ma aha qasab inay xoogga riixaya noqoto. Markaa ayay xubintii ku qortay fikraddii

waraaqihii shaqada ee tababaruhu uu siiyay si ka qayb galayaashu ula socdaan fikradaha ay doonayaan in ay xusuustaan, una noqdaan mar dambe.

Iyada oo xubintaasi dib u akhriyaysa qoraalladeedii xusuuseed mar nasasho gaaban loo baxay ayay samaysay liis googol-xaadh ah oo ka kooban xubnaha golaheeda ah ee laga yaabo inay taageeraan fikraddan una dhawdahay inay soo dhaweeyaan kala qayb qaadashada kooxaha kale ee bulshada badh ka mid ah hawlaha adeegga guud ee bulshada.

Xubintan ayaa waxay si dhakhso ah ugu soo bandhigtay qof ka qayb galayaasha ka mid ah xilli tababar socday. Qofkii ayaa ka dalbaday bal inay eegto cidaha laga yaabo inay fikraddan taageeraan ama ka hor yimaadaan iyo sida haboon ee fikraddan golaha loogu soo bandhigi lahaa.

Halkaa xubintii “A” waxa ay isu gaysay waxaa oo fikrado ah waxana ay ka dhigtay qorshe shaqo oo ay niyaysay inay fuliso marka ay shaqadii ku laabato oo aanay marna dib u dhigin.

Markii ay xubintii “A” ku laabatay shaqadii waxa ay ku mashquushay xog ururin, si ay u eegto khibrad ahaan sida dawladdaha hoose ee kale ugu guulaysteen ka qaybgalinta ururada iyo wakaaladaha si ay u bixiyaan adeegga guud. Halkaa waxaa galay maskaxdii xubintaa qorshe ay kaga qaybgalinaysa kooxaha kale ee bulshada hawlaha adeegga guud. Tallaabo ay markiiba qaaday waxa ay ahayd inay qorshaysay la kulanka duqa iyo dhawr xubnaha golaha ah kuwaas oo ay is lahayd waa kula aragti xagga “ wadaagga adeegga guud” si ay fikraddan ula soo qaaddo, ka dibna eegto go’aanka.

Markii la kulmay, xubintii “A” waxa ay la yaabtay in “wadaaggaasi” ay la dhaceen qolooyinkii sahirka yimid. Shaqaalaha oo aan dan ka galin fikraddan ayaa joojiyay in arintan bari hore laga doodo.

Iyada oo ka raalli ah natiijadii shirkaa ayay xubinta “A” diyaarisay soo jeedin, si loo eego adeegyo dhawr ah oo dawladda hoose imika toos gacanta ugu hayso oo ay aad ugu haboontahay in si wadaag ah loo guto. Waxa uu ahaa magaca xubintaasi mid lagu daray liiska dadka fadhiga wax barasho ee soo socda ee ku saabsan (( Taxanihii hogaanka la soo doortay )) ka qaybgalaya.

## **Tusaalaha gudbin waxbarasho oo aan lagu guulaysan**

Xubinta “B” ayaa ka qaybqaadatay isla fadhigaa waxbarasho iyadoo ah xubin “gole oo wax suurta galinaysa”

Sida xubintaa hore ee “A”.Goortii uu tababaruhu bixinayay dariska ayaa xubinta “B” waxaa soo jiiday fikradda wadaaga lala yeelanayo bulshada wakaaladeheeda iyo ururadeeda si loo bixiyo adeegyo dawlada hoose had iyo jeer kaligeed bixiso iyadoo awoodeeda oo kaliya adeegsanaysa.

Sida xubinta “A” qofka “B” waligii muu filayn in adeega guud ay karaan ururo iyo wakaalado kale, markii ay odhaahda tababaruhu soo martay waxay la noqotay in hadii la

**Tusaha Xubnaha  
Degaanka ee  
Adeegsiga  
barashada**

**Taxanaha  
Agabka Tababarka**

heleba in yar uun ay saaxiibadii ku raaci doonaan fikradda ah in shaqada dawladu tahay inay shookaanta doonida hayso ee aanay qasab ahayn in ay doonida xoog ku riixdo. Halkii uu waraaqaha shaqada ee tababaruhu siiyay uu arinkaa kaga qoran lahaa si aanu u ilaabin fikradan soo jiidatay. Waxa ay “B” la noqotay inuu arinkaa maskaxda uun ku hayo oo uu arinkaa maayarka iyo golaha magaalada la soo qaado waqtiga haboon, marka uu shaqadii ku laabto.

Markii uu tababaruhu keenay fikradaa si loogu tababaro xubinta arinkan, si ay uga taageerto fulinta xubinta “B” wuxuu waqtigiisa ku qaatay raadinta hadiyado uu caruurtiisa siiyo marka uu laabto. Qorshaha shaqo ee uu uugu tala galay marka uu laabto, way ka muuqataa inuu war ka siiyo golihii fikradda wadaaga, hase yeeshee waxa dhiman istraatiijiyadii fulinta.

Xubintii “B” ayaa shaqadii ku laabatay markii fadhigii wax barashadu dhamaaday. Marka ay laba wiig tageen ayuu fikradii “wadaaga” u sheegay xubin kale oo golaha ah. Markaa siduu filayay jawaabtii xubintu may dhiiri galin

waxana uu ku yidhi “waar miyaad ciyaaraysaa” “dadka footaynayaana taageeri maayaan. Ta kale hadii wakaalad kale la yidhaa adeega bixi, taasi waxa weeye shaqaalaheenii ha shaqa waayaan. Waxaa oo kale anigu ma ogoli hadii qudhaadu aad shaqadaada golaha qiimayso, fikradaa ogolaan maysid”.

Sida xooga leh ee saxiibkii gaashaaanqka ugu dhuftay ayaa ku filnayd in xubintii “B” ka niyad jabto in arinkaa cid kale uu usoo bandhigo.

Iskumana uu dayin inuu baadho siyaalaha dawladaha hoose ee kale u dhaqmaan ee ay adeega oo lala wadaago u raadsadaan.

Ma muuqato in wixii xubinta “B” uu ku arkay fadhigii waxbarashada uu waligii u keenay is badal wanaagsan oo adeeggiisa ah ama galiyay firfircooni golihiiisa dhammaan. Waxaana la odhan karaa xubinta “B” waa uu ka hor iman karaa mustaqbalka kharashka lagu bixinayo tababarkiisa iyo tababarka asxaabtiisa golaha isagoo u arka xoolihii ummadda oo si xun loo isticmaalayo.

**Tusaha Xubnaha  
Degaanka ee  
Adeegsiga  
barashada**

**Taxanaha  
Agabka Tababarka**



## **Milicsi**

Bal adigu maxaad yeeli lahayd? Xusuuso xaalad ku soo martay adiga oo xubin golaha ah oo awooddii aad ku bixisay in fikrad cusub la hirgaliyo ay cid kale ka hor timid, maxaa markaa dhacay?. Maxay raad ku yeelatay taasi wax qabadkaagii iyo naftaadiiba?. Maxaad samayn lahayd sidii aad xaaladaha u wanaajin lahayd si dadka kale fikradaada u qaataan?.

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

**Tusaha Xubnaha  
Degaanka ee  
Adeegsiga  
barashada**

**Taxanaha  
Agabka Tababarka**

## **Caqabadaha adeegsiga barashada**

Waxa Buuggan laguugu sheegayaa fikradda ah in khibrad tababar oo kastaaba, xataa hadday tahay ta u wanaagsan xag qorshe iyo xag fulineedba, inay la kulmayso dhibaatooyin marka la gaadho xilliga fulinta waxa la soo bartay.

Buug hore oo (UNCHS) (Habitat) soo saartay oo ahaa taxanaha qalabka tababarka, waxa lagu xusay caqabadaha caadiga ah ee fulinta wixii la soo bartay ka hor yimaad goobta shaqada.waxana halkan aannu soo doornay caqabadaha la filayo ee loo baahanyahay in xubnaha goluhu iska xaadhaan marka ay ka laabtaan fadhigan hogaanka la soo doortay lagu tababarayo.<sup>2</sup>

**Tusaha Xubnaha  
Degaanka ee  
Adeegsiga  
barashada**

**Taxanaha  
Agabka Tababarka**


- 1. Golaha oo laga la'yahay inay ka qayb qaataan bilowga jidkii tababarka.**  
Haddii aan maayarka iyo xubnaha kale ee goluhu aanay si toos ah ugu jirin aqoonsiga xidhiidhka ka dhexeeya tababarka iyo baahida loo qabo in la hagaajiyo adeegga golaha, waxaa dhacaysa in aanay isku hawlin ka faa'iidaydiga wixii aad tababarka ka keentay.
- 2. Dhibaatooyinka soo laabashada.** In laga guuro tababarkii oo loo guuro shaqo way adagtahay. Waxa aad arkaysaa in ay dhib yartahay ku noqoshada caadooyinkii hore iyo in aad iskaga tagto wixii aad soo baratay iyo wixii la rabay ee ahaa hagaajinta tayada shaqaalaha iyo golaha, Haddii aanad yeelan qorshe mustaqbalka ah oo aad ku fulinayso wixii aad soo baratay kaalintaadii xubinta golaha, iyo xidhiidhadaada iyo hawlahaaga.
- 3. dadka dhiggaaga(aynigaaga) ah oo xoogga saaraya in wax kastaa sidii ahaado.**  
Tababarku wuxuu dhalaa wax korodhsi (wax barasho), wax barashaduna waxay ku faraysaa in aad is bedel keento. Marka aad goobtii shaqada ku laabato ee aad tababarka "hogaanka la soo doortay" dhamayso, waxaad arki saaxiibadaadii aan iman tababarka oo waxaad keentay dan ka lahayn amaba ka soo horjeeda fikradaha cusub ee aad soo jeedinayso. Mararka qaar ayaa awoodda aad doonayso inaad wax ku hagaajiso loo micnaysanayaa waji kale ama ay ka shakiyayaan qolooyinkii aan caadaysan is bedelkan cusub ee kugu yimid.
- 4. himilooyin aan waaqici ahayn.** Ma aha mid aan caadi ahayn in marka aad soo qaadato tababar culus ee aad rajaynayso himilooyin waawayn, leedahayna qorshayaal ballaadhan oo aad is leedahay gali goobtaada. Waxaa dhici kara inaad fashilaad ku dhacdo oo dhakhso aad u daasho, marka awooddii aad is lahayd wax ku fuli dan laga gali waayo ama lagugu collaysto. Ta kale himilooyinka aan waaqiciga ahayn ee qolooyinkii aan tababarka ka qayb qaadani ay filayaan waxa ay dib u dhac ku keenaysaa gudbinta wixii aad soo baratay, waa marka ay dhakhso u waayaan natiijooyinkii ay filayeen, ama wax u dhici waayaan sidii ay iyagu filanayeen.

## **Qaadista Caqabadaha**

Muddo ku dhaw(50) sanadood ayaa nin hormood ah oo bartay cilmi maskaxeedka bulshada oo la yidhaa (KURT LEWIN) uu diyaariyay hab is bedel oo lagu fulin karo qorshaynta iyo isticmaalidda " Barnaamijka fulinta wixii la soo bartay". Wuxuu "LEWIN" rumaysnaa in dhaqanka jira badalaaddiisa loo maarayn karo hab saddex tallaabo ah.

- 1) Dhaqaajin** (qofka oo hela farsamo cusub ama hab uu ka hirgalinayo golihiisii).
- 2) Raadin** (qofka oo raadiya fursado uu ku fuliyo wixii uu soo bartay isaga oo shaqadiisii xubinimo sidiisii u gudanaya markaa qiimeeya natiijada). Iyo,
- 3) La qabsi** (farsamooyinkii cusbaa oo shaqadaadii iyo hab dhaqankaagii xubin-nimo ka mid noqda ama adoo iska dhaafa (iskaga taga) farsamooyinka cusub oo xaaladihii hore iskaga noqda).

Wuxuu LEWIS xusay in urur kasta ama koox kasta ama qofku taaganyahay nuqdad(goob) ay isu dheeli tiranyihiin awoodihii isbedelka ka soo horjeeday iyo kuwii isbedelka taageerayay. Isbedelkuna wuxuu kala daadiyaa miisaankii ( isu dheeli tirnidii) meeshaa. Doorashada aad doorato in lala qabsado isu dheeli tirni cusub ( ogolaanshaha iyo farsamooyinka cusub ee aad kala timid tababarkii hogaanka la soo doortay), ama iska haysashada xaaladdii hore, waxa ay ku xidhantahay xidhiidhka labada awoodood oo iska soo horjeeda (mucaarid iyo muxaafid). Habka lagu qiimeeyo labada awoodood: tii dhaqaajinaysay iyo tii xakamaynaysay isbedelka waxa la yidhaa: “Qiimaynta goobta awoodda”.



**Tusaha Xubnaha  
Degaanka ee  
Adeegsiga  
barashada**

**Taxanaha  
Agabka Tababarka**

Tusaale ahaan, xubin gole ayaa soo dhammaaysatay fadhi waxbarasho oo ay bixisay hay’adda UNCHS kuna saabsanaa sidii xubinta goluhu “suurto galiye” u noqon lahayd. Xubintii ayaa kursigii shaqada dib ugu laabatay, isaga oo ammaanaya sida ay muhiim u tahay in wax badan dhinaca kooxaha iyo ururada bulshada ee kale laga fulin karo. Xunbintaasi waxa aynu filaynaa in laba awoodood uu dhex yaalo isuna dheeli tirayo, qolooyin doonaya isbedel ( u ogolaanaya kooxaha bulshada ee kale inay aad uga qayb qaataan arimaha bulshada abaalkeedana helaan) iyo awoodo taasi xakamaynaya ( una arka in goluhu yahay ka mudan inuu bulshada dhaqaajiyo ). Si haddaba isbedel u dhaco ( waa sidii loo kordhin lahaa awood qaybsiga lala yeelanayo kooxaha bulshada ) waa in miisaanku u janjeedhsadaa xagga awoodda wax dhaqaajinaysa (is bedel doonka ah ).

Intooda badan qolooyinka gacanta ku haya qiimaynta goobta awooddu waxay isku raacsanyihiin saddex taagtiig (hab ama farsamo ) oo isbedelka lagu samayn karo:

- 1) In la xuso awooddii wax dhaqaajinaysay ee waday isbedelka lana xoojiyo xoogeeda.
- 2) In hoos loo dhigo ama meesha laga saaro awoodaha wax xakamaynaya.
- 3) In la bedelo dhinaca awooddu u socoto.

## **Milicsi**

Urur kasta waxaa ka jira carqalado hortaagan fulinta wixii lasoo bartay. Ka fakir daqiiqado carqaladaha ka jira ururkaaga si ay kuugu suurto gasho inaad fuliso waxaad ka qaadatay “fadhigan hogaanka la doortay lagu tababarayo” waa kuwee qaar ka mid ah awoodaha wax

xakamaynayaa? Iyo qaar ka mid ah awoodaha wax dhaqaajinayaa?. Adoo dooda la sheegay eegaya waa maxay tag tiiga ugu haboon ee aad hoos ugu dhigi karto carqaladaha?

Awoodihii wax xakamaynayay: \_\_\_\_\_

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

**Tusaha Xubnaha  
Degaanka ee  
Adeegsiga  
barashada**

Awoodihii wax dhaqaajinayay: \_\_\_\_\_

---

---

**Taxanaha  
Agabka Tababarka**

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

Taagtikadiiii aad ku dheeli tiri lahayd awoodahaa si isbedelkii u yimaado: \_\_\_\_\_

---

## **Qorshaynta gudbinta waxbarashada**

**Tusaha Xubnaha  
Degaanka ee  
Adeegsiga  
barashada**

Ujeedada aanu buugan ka leenahay waxa weeye in xooga la saaro waxbarashada xubinta. Waxana aanu rajaynaynaa in wixii carqalada ah laga hortago, kuwaas oo inta badan hor yimaada xubnaha golaha ee “Tababarka ku saabsan taxanaha hogaanka la soo doortay” markaa uun dhamaystay. Iyada oo aanu sheegayno sida annu rumaysannahay in dawga xubinta loo xaadhi karo bal waxoogaa.

**Taxanaha  
Agabka Tababarka**

Kormeere hawsha tababarka ka war hayay in kabadan (40)kii sannadood ee tegey ayaa tilmaamay saddex xaaladood oo lagama maarmaan u ah tababarka gudbintiisa. Ugu horrayn in tababrku khuseeyo shaqada la qabanayo kuna haboonyahay goobtaa. Ta labaad in qofka la tababarayaa diyaar u yahay inuu barto waxa la barayo. Ta saddexaad in qofka la tababaray lagu dhiiriyo inuu fuliyo wuxuu soo bartay. Sida aynu aragno xaaladda saddexaad ayaa ah ta ugu dhibta badan. Labada qoraa ee BROAD iyo NEWSTROM ayaa hore u mariyay fikradda wadaagga si loo saxo mushkiladihii la xidhidhayay gudbinta waxbarashada. Waxaa meesha soo galaya qolooyinkii tababarka bixinayay, kuwii la tababarayay(xubnihii) iyo dadka ama ururada ay dani ugu jirto isticmaalka tababarka si ururkoodu u noqdo mid tayo iyo wax soo saar badan leh ( Maayarkii iyo xubnihii golaha magaalada). Waxa ay labada qoraa keeneen isticmaalka isticmaalka istiraatiijiyo gaar ah oo aqoonta lagu gudbiyo:

- Goobta shaqada, inta aanu tababarku bilaabmin(in la helo heshiis gudaha ururka ah oo ku saabsan hab adeeg oo gaar ah iyo in ka qaybgalayaasha la yidhaa natiijada idinkaa masuul ka ah).
- Marka goobta shaqada laga yimaad ee tababarka lagu jiro (in ka qaybgalayaashii la siiyo ujeedooyin fulintooda xoogga la saaray, in qofku iskii warbixin u keeno iyo in uu fursadaha ka faa’iidaysto isaga oo si joogta ah u qoranaya fikradaha cusub, la shaqaynaya kooxaha taageerada si afkaaraha loo kala qaato iyo inuu yeesho qorshe

shaqo oo laabashadiisa u gaar ah); iyo,

- Marka uu ku noqdo goobtii shaqada, tababarka dabadii (xog qaadasho, eegis fursado lagu hirgaliyo farsamada, iyo taageerada dhiggaagu ku siiyo marka aad bandhigto habka aad rabto).<sup>5</sup>

Sawirka “1” ee ku yaal bogga kan ku xigaa waxa uu tusinayaa 27 istiraatiijiyoo oo wixii la bartay lagu fulinayo oo la rumaysanyahay inay ku haboonyihiin waxna tarayaan xubinta golaha ee ka qaybqaadanaysa fadhigan waxbarasho ee loo qabtay hogaanka la soo doortay. Istiraatiijiyadaana waxaa lagu habeeyay shax sheegaysa goorta, inay ka horaynayso ama ka dambaynayso tababarka ama qabsoomayso dhexdiisa, iyo qofka ka mid ah dadka muhiimka ah ee ka qaybqaadanaya ee qaadaya masuuliyadda fulinta si loo habsado in istiraatiijiyadii fusho.<sup>6</sup>

Sawirka 1: sharaxa fulinta wixii la soo bartay

	<b>Tababarka ka hor</b>	<b>Tababarka gudihiisa</b>	<b>Tababarka ka dib</b>
<p><b>Tusaha Xubnaha Degaanka ee Adeegsiga barashada</b></p> <p><b>Taxanaha Agabka Tababarka</b></p>	<p>Xubnaha oo ka qyb qaata qeexida ujeedooyinka adeegga laa rabbo ee ka dambeeya tababarka</p> <p>Dadka oo aqoonsada xubnuhu inay waqti ku qaataan sidii ay uga qayb qaadan lahaayeen xirfad inay korodhsadaan</p> <p>Iyada oo si rasmi ah loo ogolaado in tababarka hogaanka la doortay awood siinayo muhiimna u yahay tayada golaha</p>	<p>In laga jiro xubnaha golaha ee tababarka ku jira waxyaalaha jeedinaya ama qasaya een loo baahnayn.</p> <p>Xilakiii laga filayey xubinta golaha oo si ku meel gaadh ah loogu dhiibo cid dhiggiisa ah</p> <p>Ka qayb-qaadashada shaqooyin loo qorsheeyey inay dhiiriyaan farsamooyinka cusub si kor loogu qaado tayada guud ee golaha</p>	<p>Xog ka qaashada xubnihii tababarka qaatay si uu u ogaado waxa dhacay una eego qorshahooda waxbarasho fulineed</p> <p>Inuu siiyo xubnaha fursado si farsamooyinka cusub ay u tijaabiyaan, bulshaduna ay guushooda u garawsan lahayd</p> <p>In awooda la aisu geeyo si loo fuliyo farsamooyinka cusub barnaamijna loo dejisto si xubnaha kale ee golaha loo kala xog qaato.</p>

**Tusaha Xubnaha  
Degaanka ee  
Adeegsiga  
barashada**

**Taxanaha  
Agabka Tababarka**

	<b>Tababarka ka hor</b>	<b>Tababarka gudhiisa</b>	<b>Tababarka ka dib</b>
<b>Tababarayaashii</b>	<p>Inay tababarka ku began baahida ujeedooyinka iyo arimaha madaxda dawladda hoose ee la soo doortay</p> <p>Inay tababarka ku began baahida, ujeedooyinka iyo arimaha madaxda dawladda hoose ee la soo doortay mudnaantana siiyaan.</p> <p>Inay xubnaha ka qayb galayaasha ahi ka qayb qaataan qiimaynta iyo eegida qorshayaasha tababarka si shaqooyinkooda iyo qorshuhu u xidhiidhsanaadaan.</p> <p>Inay qaybiyaan qalab tababarka ka horeeya, sameeyaana xogg ururin si xubnaha golaha</p>	<p>Inuu jiro faham la xidhiidha waxa ay xubnaha la tababaray qaban karaan si ay farsamooyinka Inuu jiro faham la xidhiidha wxa ay xubnaha la tababaray qaban karaan si ay farsamooyinka cusub meelahooda uga hirgeliyaan</p> <p>In laga taageero xubnaha sidii ay uga ballan qaadi lahaayeen fulinta waxay bardeen lana tuso sida ay doorkooda uga fulinayaan waxay bardeen</p> <p>Inay isticmaalaan adeegkaaliyayaal si loo xoojiyo fahamka waxbarashada iyo in la adkeeyo ballanqaadka fulinta</p>	<p>In la abuurto himilooyin tusaya in guulo ka dambayso awooda lagu bixiyo fulinta wixii la soo bartay</p> <p>In la abuurto himilooyin tusaya in guulo ka dambayso awooda lagu bixiyo fulinta wixii la bartay</p> <p>Dabagal la sameeyo iyada oo la isticmaalayo qoraalo, telifoono iyo booqashooyin goobta shaqada si loo soo eego natiijoyinka caqabadahana loo qaado.</p> <p>In la qabto baadhitaano qiimayn ah iyo fadhigo dar-dar gelin ah, ay jirtana war celin natiijada ku saabsan oo loo gudbiyo xubnaha iyo dadka dhiggooda ah.</p> <p>In lagu noq-noqdo qalabka tababarka si loo fahmo cilmiga iyo farsamooyinka</p> <p>Dib u eeg awoodda jirta si aad waxaad baratay ugu hormariso adeegga. Natiijadada qiimayn ku samee</p> <p>La yeelo xidhiidh xubnaha kale ee golaha ee tababarka soo qaatay aee lala yeeshay ballanqaadyo fulineed. ( fulin wixii la soo bartay)</p>
Xubnaha golaha ee tababarka ka qayb-qaadanaya	<p>In fursad kasta laga faaiidaysto sidii qorshaha fadhigada waxbarasho wax loogu kordhin lahaa</p> <p>Waxaad u fishaa fursadaha badan adeeg wanaagsan oo tababar suurto galiyey</p> <p>Si fir-fircoon uga qayb-qaado dhamaan arrimaha tababarka ee la qorsheeyo</p>	<p>Ururi qoraal aad ka samayso waxaad baratay si aanad u iloobin marka aad laabato</p> <p>La lahow heshiis xubnaha kale ee golaha ee tababarka jooga si aad iskala socotaan fuulitaan waxa la soo bartay</p>	

## **Aqoon-is-weydaarsi horaad: qiimaynta diyaar-garowga**

Waxa si guud loo rumaysanyahay in dadka la tababarayaa ay qaataan tababarka una dhawyihiin inay fuliyaan waxay bartaan, haddii ay arkaan in tababarkaasi baahiyahooda khuseeyo. Taana waynu ku waafaqsanahay. Sidaa darteed waxa aan keenay hab cusub oo xubnaha goluhu ay ku qiimaynayaan meelaha ay ku xoog badanyihiin iyo meelaha ay ku jilicsanyihiin marka la eego “II” ka door (kaalmood) ee hogaamada la soo doortay. Qaybta labaad ee buugan waxa aad ka heli su’aalo qiimayn adeegga qofka ku saabsan. Su’aalahaasi oo dhamaystiran oo wata tilmaamo iyo tusaalooyin waxa loogu tala galay inay taageeraan xubnaha golaha sidii ay u qiimayn lahaayeen xirfaddooda imika ee ku saabsan kaalin kasta iyo inay warkaasi ku go’aan qaataan oo ay eegaan fadhiga waxbarasho ee taxanaha waxbarasho ka mid ah ee ay ka qayb qaadanayaan iyo sida ay isugu xig-xigsiinayaan.

Ta kale, waxaa lagaa filayaa inaad go’ aanada qaar hore u gaadho oo aad tilmaanto horumarka gaarka ah ee ku yimid kaalin kasta oo xubinta khusaysa. Waana inaad qortaa kaalin walba ujeedooyinka horumarinta ee ku saabsan. Ujeedooyinka la qoraa waxay qolooyinka dhiggaaga ah ee golaha ku jira ku caawinaysaa inay fahmaan waxa aad rajaynayso inaad faa iido markaad tababarka timaad iyo sida tababarkaasi golaha u hagaajinayo. Waxa kale oo ujeedooyinka qorani siinayaan dariiq macna leh ( waxa laga yaabaa inuu yahay dariiq kaliya ) kaas oo lagu qiyaasi karo raadka tababarku ku yeeshay golaha, iyo ururka iyo waliba bulshada.

**Tusaha Xubnaha  
Degaanka ee  
Adeegsiga  
barashada**

## **Aqoon-is-weydaarsiga gudhiisa: qorshaynta adeegsiga wixii la bartay**

**Khibrad wadaag:** Maaha deg-deg haddii saacada u horaysa ee furitaanka aad danayso sidii loo fulin lahaa waxa la baranayo. Sidaa daraadeed, dhamaan fadhiyada waxbaraho ee taxanaha hogaanka la soo doortay, waxa aanu rajaynaynaa in dadka tababarka qaadanayaa inay warsadaan xubnaha golaha ee jooga ee hore uga qayb qaatay fadhiyadan taxanaha ah si ay aragtiyahooda iyo khibradahooda u qaataan, markaana su’aalo kala duduwan waydiiyaan. Tusaale ahaan, mid ka mid ah ayaa odhanaya (dhab ahaan wuu i caawiyay tababarkii xaggii go’aan qaadashada iyo kala fahamka waxa u dhexeeya mushkiladda iyo xalka. Bal adigu sideed u aragtaa? ). Nusa saace lagu qaato dib ujaleeca khibradihii la korodhsaday ayaa arinkaa ku filan iyo in la is xasuusiyo in fadhiyada dambana sidaas oo kale u bilaabmaan. Farsamooyinka oo sidaa loo wadaagaa waxa ay keentaa in si joogta ah arinkaa loo wado waxana ay aad u dhiirisaa ka qayb galayaashu inay wax qabtaan oo ay fuliyaan aqoonta iyo xirfadda cusub ee ay korodhsadeen.

**Taxanaha  
Agabka Tababarka**

**Barashada ujeedooyinka:** waxaa laga yaabaa in lagaa codsado inaad kala qayb qaadato ujeedooyinka aad ka leedahay fadhigan waxbarasho ee aad ka qayb qaadanayso tababaraha iyo ka qayb galayaasha ama kooxda dhamaan. Sida arinkani u fulayo waxaa laga yaabaa in barayaashu ku kala duduwanaadaan. Diyaarinta ujeedooyinka iyo qaadaa dhigoodu waxa ay dhalinaysaa inuu jiro faham la wadaago oo ku saabsan meelaha ay muhiimka tahay in la horumariyo, waxana ay ku siinaysaa inaad haysato wax go’an ood xoogga saarto inta



tababarku socdo waxana ay dhalinaysaa in lagu ballamo in farsamooyinka cusub lagaga faa iidaysto kaalinta xubinmo ee qofku xil ahaan hayay.

**Qoraal qaadashada:** waa masuuliyadda qofka la tababarayo inuu xil iska saaro waxbarashada oo uu tilmaamo fursadaha, isticmaalo qalabka waxbarashada si uu adeeggiisa xubinnimo u horomariyo. Qaybta labaad ee buuggan waxaad ka heli waraaqo shaqo oo layidhaa “qoraal qaadashada fulinta wixii la bartay” waxaana lagaa rabaa inaad isticmaasho intaad fadhiyada ka qayb qaadanayso. Waraaqahaasina waa qaar ku haboon inaad ku qoroto fikradaha waxtarka ah iyo wixii ku soo jiita, iyadoo ah in la qoro isla markaaba, hal kii aad ka sugi lahayd inta fadhigu ka dhamaanayo.

Adoo xasuusutaada is leh adeegso oo (hadhow qor ). Qoraladaasina waa wax muuqda oo qoran oo aad saaxiibadaada golaha la wadaagi karto waxana ay caddaynayaan hor-umar iyo in la helo fadhiga hortii ujeedooyinka waxbarashada.

**Qorshaynta iyo tababarka dhiggaa:** waxa aad haysataa fursad mar kasta oo ay soo dhawaato gabagabada fadhiga waxbarashadu in aad la shaqayso mid ka qaybgalayaasha tababarka ah, oo aad bilowdo in aad ka fikirto, oo aad samayso, oo aad qorshayso sidii aad si fiican u isticmaali lahayd waxaad ka baratay fadhigii eek u saabsanaa masuuliyadaha xubinimo. Halkaad arinkaa kaligaa samayn lahayd waxa aad la shaqaynaysaa (lamaane), qof ka mid ah ka qaybgalayaashii mudo saacad ah ama ku dhow. Muddadan gudaheeda mid kastaaba labadiinaa mar ayuu tababarka bixinayaa, ta kale fursad wuxuu u helayaa in isna la tababaro.

**Tusaha Xubnaha  
Degaanka ee  
Adeegsiga  
barashada**

Maxay tahay inaad noqoto “Tababare”. Qofka qabanaya xilka tababarka ee fadhiga waxbarasho ee ku saabsan hogaanka la soo doortay, wuxuu caawinayaa qof kale oo ka qaybgalayaasha ah, si uu uga fikiro una qorsheeyo sidii uu u gudbin lahaa waxa uu halkan ku bartay ee ku saabsan kaalinta xubinta. Tanna waxa ay ku suurto galaysaa marka laysu geeyo adeegyo: su’aalo la is waydiiyo si macnaha loo fahmo, adoo kaalintii cusbaa qaata lana yimaadda, si qofka kalsooni

u gasho oo hadhow uu ula yimaado, iyo waliba adigoo la dooda saaxiibkaa haddii aad is tidhaa wuu wareeray oo muu fahmin.

**Taxanaha  
Agabka Tababarka**

**Habdhaqanka tababarista tayada leh:** mas’uuliyiinta tababarku waxay isku raacsanyihiin in dhaqanada soo socdaa ay waxtar leeyihiin oo ay caawinayaan sidii uu ka qaybgaluhu uu u qorshayn lahaa inuu shaqadiisa ku isticmaalo cilmigii iyo qorshihii uu ka soo korodhsaday fadhigii waxbarasho. Waxana aanu kugu adkaynaynaa in aad ka fikirtid isticmaalkeeda marka aad ka qaybqaadanayso tababarista la xidhiidha fadhiga waxbarasho.

1. Hubso in qofka aad tababaraysaa ( ka qaybgalaha lamaanahaaga ah) ay dhab ka tahay, doonayana dhab ahaan taageero, diyaarna u yahay inuu qaado masuuliyada buuxda ee wixii la qabto ama aan la qaban marka uu tababarka dhamaysto.
2. Waxa aad dhigaysa xeerar asaasi ah oo ku saabsan fadhiga tababarkaaga, sida inaad diido isticmaalka ereyada ah “ma karo” iyo “waan isku dayi” waana in lagu badalaa “waan karaa” iyo “waan samayn”.
3. Waxaad xoogga saartaa in qofka aad barto siduu waxa wanaagsan u fali lahaa halkii aad u sheegi lahayd (( sidii aanu waxa xun u sameeyeen ama iskaga jiri lahaa )). Haddaynu eegno waqtiga – tusaale ahaan- waxaa wanaagsan in qofka loo

sheego in shirarka waqtigooda uu yimaado, halkii aad uga digi lahayd habsanka, maxaa yeelay qofka oo aad ku tababarto inuu wax iska jiro, waxaa laga yaabaa inay u gayso wixii looga digayay. Haddii si kale loo dhigo wixii laga reebayay ayaa laga yaabaa in naftiisu ku dhacdo.

4. Dhegta raarici ( madaxa ood ruxdo, indhahaaga ood soo jeediso, afka oo aad ka ogolaato, hadalkood si kale u dhigto IWM) si aad u fahamto, isticmaal su'aalaha si doodu u socoto horena loogu socdo.
5. Aad u dhiiri in farsamooyinka la fuliyo iyada oo la isticmaalayo habka cusub ee la bartay, adoo isku dayaya gudashada kaalintaadii, bandhigaya waxaad baratay, ku duubanaya cajalado, ama siyaalo kaleba isticmaalaya. Waxaad diyaarisaa goob aanay ceeb ahayn inuu qofku khaldamo, sidaana hawsha u wad ilaa qofka kale habka cusub ku qancayo.
6. Qofkii kale la heshii si uu u fuliyo wuxuu bartay markaa isdhaafsada doorka (kaalinta)

**Qorshaha fulinta wixii la bartay:** Tallaabada ugu dambaysa uguna muhiimsan ee loo baahanyahay inaad qaado inta aanu fadhigan waxbarasho dhamaan waxa weeye inaad diyaariso qorshe qoran si aad u isticmaasho cilmigii iyo xirfadihii aad korodhsatay. Qorshaha laabashadu (waa fadhigii waxbarashada ood ka wareegto oo aad ku noqoto shaqo maalmeedkaagii ahaa masuuliyadihii xubinimada ) wuxuu kugu caawinayaa:

- Caddaynta isbedelada muhiimka ah ee aad goosatay in aad samayso, si gaar ahaaneed iyo si guudba adoo sheegaya isbedelka waxa aad ku fulinayso, goorta , meesha, iyo sida aad u fulinayso.
- Waxa aad malaynaysaa raadka isbedeladani ay ku yeelanayaan xubnaha kale ee golaha iyo shaqaalaha dawladda hoose iyo dadka waaweyn ee macaamilka ah ee laga yaabo in talaabooyinkaagani raadeeyaan.

Ka bilow habka qorshaha laabashada in aad dib u jaleecdo qoraaladaadii iyo xusuusihii. Waxaad doorataa mid ama dhawr wixii aad soo baratay ah, kuwaas ood is leedahay inay raad wanaagsan ku yeelan doonaan goobta aad ka shaqayso, waxtarna u leh hawl karnimadaada(Tayadaada) mustaqbalka. Tusaale ahaan waxaad goosatay inaad ka faa iidsato fikrado ku saabsan fadhigii waxbarasho ee ahaa “xubinta golaha awoodiisa wax qabasho”, markaasi aad bilowdo in aad la wadaagto in badan oo ah awoodaada xubinimo shaqaalaha, adoo muujinaya jajabni badan si ay u gaadhaan go'aanada shaqa-maalmeedka. Waxaad arki in tani u faa iido badantahay shaqaalaha iyo goobta shaqadaba mustaqbalka fog.waxana go'aankaasi uu noqonayaa qorshaha soo laabashadaada gun dhiga u ah. Waxa aanad xoogga saaraysaa in aad keento hab waaqici ah oo aad awoodda u qaybiso adoon lagu arag daciif xagga shaqaalaha, lagaana dareemin war-war.

Waa inaad caddaysaa waxa aad doonayso in la qabto adoo intaad karto qeexaya. Si wax tar leh oo lagu qeexi karo waxqabashada aad maskaxda ku haysaa waa su'aalahan oo aad is waydiiso.

**Tusaha Xubnaha  
Degaanka ee  
Adeegsiga  
barashada**

**Taxanaha  
Agabka Tababarka**

**Tusaha Xubnaha  
Degaanka ee  
Adeegsiga  
barashada**

1. Waa maxay dariiqadaha cusub ee wax loo qabto ee inaan qaato ay tahay? Waxaa laga yaabaa inaad rabto dhiirinta golaha magaalada si loo qaato nidaam siinaya agaasimaha magaalada awood uu ku ogolaan karo( saxeexi karo) iibka aan ka badnayn lacag go'an oo la xusay, isaga oo aan u baahan in arinkaa uu golaha magaalada saxeexa ka hor soo hordhigo. Waxaad tan uga jeedaa inaad iibka joogtada ah habsanka ka ilaaliso.
2. Waa goorma marka ay sidani ay dhacaysaa? Waa goor kasta oo alaabta la soo iibinayaa ay tahay mid shaqo dawladdu leedahay laga qabanayo, lacagtiina taalo kuna jirto cidada codsatay miisaaniyadeed.
3. Yaa kale oo arinkaa soo galaya? Maayarka iyo xubnaha kale ee golaha magaalada ee loo baahanyahay inay siyaasaddan cusub ogolaadaan iyo
4. agaasimaha magaalada oo loo dhiibayo masuuliyad ballaadhan go'aanna ka qaadan kara iibab badan.
5. Goorma ayaan filayaa helidda natiijada? Muddo ah 60 cisho marka aad kasoo laabato fadhigan waxbarasho (waa fadhigii ahaa "Awoodda wax qabasho ee xubinta").
6. Sidee ayaan ku garanayaa in arinkii guulaystay? Marka ay dhacdo qaadashada iyo faafinta habkii cusbaa, iyada oo la dareemo hoos u dhaca tiradii alaabooyinka joogtada loo soo iibiyo ee had iyo jeer ku jiri-jiray ajandaha uu eegayo golaha magaaladu.

**Taxanaha  
Agabka Tababarka**

Waxa aad wadaysaa in aad samayso liis aad ku xusayso arimaha laga yaabo in marka aad shaqadii ku laabato kaa hor yimaadaan, waa marka aad fulinayso waxyaalaha aad soo jeediso. Dib u eeg waxyaalaha ka dhalan kara (sida: maxaa khaldami kara, kuma ayaa carqalad ku noqon kara in adeegu guulaysto). Haddii natiijadu noqoto mid aanad jeclaysan, waxa aad qorshaysaa tallaabo ama dhawr tallaabo oo aad qaadayso si aad jawi wanaagsan ugu abuurto tallaabooyinkan aad qaadayso. Adoo ku noqonaya tusaalayaashii "Awoodda wax qabasho ee xubinta" waxa aad qorshayn kartaa in aad yarayso waxa ku dhibaya (Natiijo ahaan) adoo masuuliyaddaadii badh shaqaalaha u dhiibaya (Gudbinta waxbarashada). Waxaad sidan yeeli kartaa adoo waydiisanaya shaqaalaha in ay si joogta ah war celin ku siiyaan (Shaqo la qorsheeyay) iyo go'aanadooda iyo wixii ay la kulmaan inta ay awooddan isticmaalayaan.

Faa iidada qorshaha dib u laabashadu waxa weeye hore u marinta fursadaha aad ku liibaanayso marka aad fulinayso waxa cusub ee aad soo baratay, adoo si deggan u sharaxaya waxa aad maskaxda ku hayso, waxana uu kaa caawinayaa inaad joojiso ama yarayso dhibaatooyinka ka iman kara isbedelkaa aad wado.

## **Aqoon-is-weydaasri dambeed: Adeegsiga xirfadaha cusub**

Waxaad imika soo gaadhay goob ka mid ah wadadii waxbarashada, waxa aad ku noqotay shaqadii waxana kaa horyimid cidhiidhigii shaqada, oo in badan kugu dhiirinaya inaad iskaga tagto qorshihii fulinta wixii aad baratay. Waxa aanu ognahay in aanad doonayn in taasi dhacdo, markaa talooyin ayaanu halkan kugu siinaynaa si aad iskaga jirto inaad caadooyinkii hore ku noqoto.

Dhigo caadooyin cusub oo shaqada ah: sida hore loo tilmaamay ujeedada ka danbaysa tababarka hogaanka la soo doortay waxa weeye in la dhaliyo caadooyin cusub oo shaqada la xidhiidha iyo dhaqana la jaanqaada baahida iyo himilooyinka doorarka (kaalmaha) is baddalaye e sarkaalka dawlada hoose. Haddii si kale loo dhigo tababarkani waxa loo qorsheeyay si uu u keeno isbadalo dhab ah oo la xidhiidha sida ay saraakiisha la soo doortay u shaqeeyaan xaga (11) ka door e ku xusan taxanaha waxbarasho. Markii in badan goobaha waxbarashada lagu tijaabiyay waxa ay waxyaalahani muujiyeen inay awood u leeyihiin keenista natiijadii la rabay. Waxa hadaba su' aashu tahay adiga xubin gole ahaan maxaad ku samaynaysaa khibradaada waxbarasho? Waxa ina hor yaala laba in lakala doorto: ina aad si firfircoon u tijaabiso fikradahan cusub oo adiga xubin ahaan qiimo awoodeed oo wayn kaalintaada u leh oo hore kuu marinaysa, bulshadana wanaajinaysa.iyo inaad iska ilowdo tababarkii oo aad ku dhaganaato caadooyinkii hore, halkaa oo aad ku lumisay wixii maalgalin waxbarashada lagu sameeyay iyo **Tusaha Xubnaha Degaanka ee Adeegsiga barashada**

fursad aad wixii xirfadaha lagu tijaabiyay karto, oo aad kartideedii leedahay. Halkan waxa la doonayaa in labadaa la kala doorto, kala doorashada adiga ayaa iska leh.

Aad ayaa loola socdaa inay adagtahay in qofku la yimaado caadooyin shaqo oo cusub. Waxase uu cadeeyay baadhitaankii lagu sameeyay gudbinta wixii la bartay in dadka la tababaray e bartay xirfadaha cusubi karti u leeyihiin inay si guul leh u gudbiyaan. Waxa laga rabaa oo kaliya inay kalsooni ku qabaan sidii ay ugu tijaabin lahaayeen xirfadaha cusub shaqadii, una heli lahaayeen xoojin iyo dhiirin awooda ay bixinayaan.

Ujeedadaydu waxa weeye ina aanu talo ku siino ah sidii aad uga adkaan lahayd awoodaha badan e qaarna adiga kaa imanayaan qaarna dibada ka imanayaan e kugu dhiirinaya ina aad faraha ka qaado xooga aad ku bixinaysyo qorshaha soo laabashada.

**Dhibaatada soo laabashada:** marka qaybtan la bilaabo buuga, waxa aanu filaynaa inaad dhamaysay mid ka mid ah fadhiyadii waxbarasho e ku saabsanaa taxanihii lagu tababaray hogaanka la soo doortay, oo aad shaqadii ku laabatay. Iyo in himilooyin xooga aad leedahay oo aad ku hubaysantahay qorshihii laabashada oo afkaaro badan oo waxbadal ah aad wadato. Markaa mashkaladu waa maxay? Waxa aanad la yaabayn ina ay jiraan dad sii jooga shaqadii oo aan sidaada xamaasad wax lagu badalaa ku jirin. Dhab ahaantii waxa laga yaabaa in goobta shaqadaadu noqoto “goob miino jiifo” oo carqalad ku noqota qorshayaalka aad maskaxda ku hayso. Dhibaatada kale e jirtaa cidda arinkaa u jilib dhigaysaa waa adiga. Qayb adiga ah xamaasad ayaa ku jirta si wixii cusbaa e aad baratay loo fuliyo. Qayb

**Tusaha Xubnaha  
Degaanka ee  
Adeegsiga  
barashada**

**Taxanaha  
Agabka Tababarka**

kalena waxa ay jeceshahay in wax kasta sidii ahaado, oo layska haysto caadooyinkii hore e gaboobay, hase ahaatee ku raali galinayay, maxaa yeelay waad caadaysatay.

Markaa waxa aad galaysaa itixaan. Tusaale ahaan, bal ka soo qaad ina aad markaa uun ku soo laabatay goobtii shaqada ood ka timid xaruntii tababarka markii aad soo dhamaysatay fadhi waxbarsho oo ahaa “xubin golaha ah oo suurto galiye ah”. Marka aad maalin ama laba cisho joogtay waxa aad ka qaybgashay shir goluhu leeayahay, waxana lagaa dalbay inaad laba meelood mid u footayso sidii loo maamuli lahaa suuqa cusub e dawlada hoose. Khibradaadii hore waxa ay ku leedahay dawlada hoose ha haysato hana maamusho suuqa halkaa oo dakhli u soo saaraysa magaalada, marka la sameeyo shaqaale cusub oo maamula. Hase yeeshee

adoo maanta sita koofiyadii tababarka “suurto galiye” waxa aad u janjeedhaa inaad ogolaato rayi maamul oo urur bulsho uu soo jeediyay. Axaabta goluhu waxa ay badankoodu kaa filayaan ina aad u footayso rayiga shaqaala abuurka iyaga oo taariikhdaadii hore eegaya. Ergada ururka bulshaduna taageero kaama filayaan, iyaga oo ku garanaya inaad tahay qof qandhadh ah oon ogolayn xal dhexdhexaad ah. Waxaad aragtay adoo ku jira mushkilad aan xal lahayn. Maskaxdaadu waxa ay ku leedahay dhinac u footee, qalbiguna meel kale. Waxa aad ku musbaarmaysaa gidaar khatarna waxa aad u tahay inaad si wayn dib uugu gurato.

**Tusaha Xubnaha  
Degaanka ee  
Adeegsiga  
barashada**

Isku day inaad maarayso dib ugurashadii: waxa caadi ah in dadka doonaya ina ay gudbiyaan waxa ay barten, kuna fuliyaan doorkooda nolosha e dhabta ah, ina ay la kulmaan dhibaatooyin ad-adag sida taa kor lagu sheegay oo kale. carqaladahaasi waxa ay ka iman karaan goobta shaqada, asxaabtaada golaha ee dareenkoodu liito, shaqaalaha shakisan, muwaadiniinta kalsooni daradu ku jirto. Ama gudahaaga ayaabay ka imanayaan adoo is yidhaa malaha rayigaagani waxqabashada dhabta ah wax ka tarimaayo, ama eega khatarta ka iman karta dabagalkiisa. Inta ay naftaada iyo tababarkii ay kala fogyihiin ee aanad waxa aad baratay waxba ka fulinayn waxaad aad ugu dhawdahay dib u gurasho.

**Taxanaha  
Agabka Tababarka**

Ninka cilmi nafsiga bartay ee la yidhaa ROBERT MARX ayaa keenay hab wax dhisaya oo lagu maareeyo mushkilada dib u gurashada tababarka. Baadhistiisu waxa ay xoogga saartay sidii loo caawin lahaa dadka dhaqan bedelka wayni ku yimid ee loogu diyaarin lahaa sidii ay ugu laaban lahaayeen goob cadow u ah oo aan taageero siinayn. Wuxuu “MARX” tilmaamay shan arimood oo goobta shaqada ku saabsan oo xoog u tilmaamaysa in qofka markaa tababarka ka soo laabtay dib u gurasho ku dhici karto. (1). Shaqo isgaadhay. (2). Shaqaalaha oo aanu taageero ka haysan. (3). Cidhiidhi xagga shaqada ah oo ku leexinaya. (4). Isku kalsooni la’aan. (5). Asxaabtaada iyo dadka aad hawsha wadaagtaan oo aan ku taageerayn<sup>8</sup>.

arimahaasi kordhaan ayay aad ugu dhawdahay inaad dib ugu laabato caadooyinkii hore ee ku raali galin jiray wax tarkooduse yaraa.

## Milicsi

Shantii arimood ee uu sheegay “MARX” waxa aanu u diyaarinay hab liis hawleed ah. Bal akhri shanta arin oo baadh kuwii goobtaada ka jiray markii aad ku soo laabatay ee aad soo dhamaysatay tababarkii fadhigii waxbarasho. Imisa arin ayaad baadhay oo aad heshay inay jiraan? Kolba inta tirada

Liis hawleed tilmaamaya dib u gurasho

Waxayaalah laga yaabo inay keenaan dib u gurashada

ma jiraa arinkaasi

1. Waxa yaala shaqo badan oo is gaadhay oo Dhakhso in loo qabto u baahan. In dhaqankii Hore la raaco ayaa dhib yar, culayska shaqaduna Waxay keentay dib u gurasho
2. Dadka kula shaqaynaya ayaan taageerin dhaqankii Cusbaa oo kula dooday kuna guulaystay inay Caadooyinkii hore kugu celiyaan
3. Cidhiidhiyo kale, qaar urur iyo qaar gaar ah ayaa I wareeriyey iguna kalifay in aan ku noqodo Caadooyinkii wax lagu xalin jiray.
4. Shaki ayaa iga galay in aan awood u leeyahay in aan U fulin karo cilmiga iyo xirfadda cusub si tayo leh.
5. Taageerada aan ka helay dhinac kasta, xagga ururka Iyo dibaduba way yarayd, anoo jecel inaan gudbiyo Fikradahaygii cusbaa.

**Tusaha Xubnaha  
Degaanka ee  
Adeegsiga  
barashada**

**Taxanaha  
Agabka Tababarka**


Haddii aad calaamadiso (ay jiraan) saddex ama in ka badan arimahaa la tilmaamay waxa aanu kuu soo jeedinaynaa inaad qaado shanta talaabo ee soo socota si aad iskaga jirto “Cudurkii dib u gurashada” dadaalkaaga mustaqbalka.

Talaabada koowaad: Waa in ay kaa dhaadhacsantahay inay dib u gurasho dhici karto. Haddii aad ka timaaddo tababarkii adoo aad u doonaya inaad fuliso waxaad soo baratay oo aad ku guulaysan waydo inaad sii wado, waxaad dareemi kartaa sidii ood fashilantay. Naftaada inaad canaanato ayaa laga yaabaa ood tidhaa daciif ayaad tahay ama aad is waydiiso in tababarku mid haboon ahaa. Aad ayaad u nafisi marka aad goortaa qirto in dib u gurashadu aanay danbi ahayn. Dhab ahaan waa mid la filayo, cid kastana way ku dhacdaa. Gaar ahaan cidda la kulanta mid ama in ka badan oo arimihii dib u gurashada keenayay ah.

Talaabada labaad: Waa in aad leedahay xilli kuu caadi ah oo aad dib u eegto waxbarashadii fadhiyadii aad ku soo qaadatay. Waa in tani kuu go’antahay oo tusaale ahaan aad bishiiba nusa-saace arinkaa ku qaadataa, taana fuli saddex bilood ka dib marka aad fadhigii waxbarasho ka soo laabato, ku noqo qorshahaagii dib u laabashada, waxana aad si gaar ah

u eegtaa carqaladaha aad filayso inay kaa horyimaadaan iyo waxa aad qorshaysay inaad samayso si aad u waajahdo.

Talaabada saddexaad: Waxa aad isku wareejisaa waxyaalo ku xusuusinaya go'aankaagii gudbinta. Waxa aannu ku talin lahayn inaad sidato kaadhadh jeebka ah oo daabacan oo fikradihii fulinta xambaarsan iyo calaamado gidaarka la sudho oo muuqda oo xambaarsan ereyo dhiiri galin ah oo bal-balaadhan sida....



## ADIGU FULI UUN

“Haddii tani macno la’aan kuu samayso, waxba ha warwarin, qabo uun, waxaad arki inay shaqaynayso eh”.

Talaabada Afraad: Yeelo qof kuu wehel yeela. Marka dib u gurasho inay dhacdo aad loo filayo, waa in aad diyaarsataa waqtiga ugu horeeya ee suurto galka ah qof wehel ah oo kula gudbiya waxaad soo baratay, waa haddii aanad diyaarsan qofkaa intii aad tababarka ku jirtay. Qofkaa aad is weheshanaysaan oo laga yaabo inuu yahay sarkaal kale oo xubnaha golaha ah oo kaala qayb qaatay isla fadhigii waxbarasho ( waxaaba laga yaabaa inuu yahay qofkii aad wadaagteen markii laba laba loo qaadayay masuuliyada wax tababarista). Kan oo noqonaya mid aad si joogto ah talada uga qaadato, kuna taageeraya isagoo adeegsanaya Telefon iyo ( Fax, E-mail ) ama kulan aad is horfadhiisataan. Wax ka wanaagsani majiraan in lagu xoojiyo waxbarashada qof kale oo isku shaqo iyo masuuliyad tihiin oo isla khibraddii aad soo wada qaadateen oo isna sidaada isku dayaya inuu waxbarashada meeleeeyo si ay uga fusho goob aan fikrad cusub laga soo dhawaynayn. La xidhiidha qofkaa.

Talaabada shanaad: waa inaad haysataa buug aad ku qorto talaabooyinka aad isku dayday si aad u fuliso waxaad soo baratay. Lahow qoraalo sheegaya isku dayadii aad samaysay si aad ugu isticmaasho waxaad baratay goobta shaqada iyo waxa xaalad kasta kula kulmay. Waa in aad si cad u sheegtaa waxaad samaysay iyo wixii dhacay, cidda arinkaa ku jirtay, iyo waxyaalaha kale ee caawinaya inay qeexaan natiijada wanaagsan ama xun. Waxana had iyo jeer wanaagsan inaad tilmaanto wixii ay ahayd inaad si sidaa ka duwan u samayso iyo waxaad damacsantahay inaad samayso marka soo socda ee ay fursaddu iskaa siiso. Qor fursad kasta oo ku seegtay oo la xidhiidha fulinta waxbarashada iyadoo si gaar ah loogu fiirsanayo sababaha keenay ( baqe, barri-u-dhig joogta ah, adoon fiiro siin, cidhiidhi kaaga yimid dhinaca dad kale IWM)

### **Fikradaha gadaal-khaladka ah**

Marka aad si dhamaystiran u akhrido qaybta koowaad ee buuggan, waxa aad qaaday talaabo muhiim ah oo aad ku horumarinayso tayadaada xubinimo. Qaybta labaad waxaad ka heli doontaa waraaqihii shaqada ee dhabta ahaa oo loo baahanyahay in aad isticmaasho

**Tusaha Xubnaha  
Degaanka ee  
Adeegsiga  
barashada**

**Taxanaha  
Agabka Tababarka**

inta aad ku guda jirto (11)ka fadhi waxbarasho ee “Taxanaha tababarka hogaanka la soo doortay”. Waxa aanu kugu adkaynaynaa in daacadnimo ah u buuxiso waraaqahan. Ha yaalaan foomamka aad buuxisay agtaada si aad xagga talada u adeegsato. Waa in aad si degan dib ugu eegtaa

waxana aad samaysataa qoraalo aad ugu diyaar garoobayso fadhiyada ku saabsan taxanaha waxbarasho ee loo qabanayo hogaanka la soo doortay ee aad kaa kadib gali doonto, waa in aad balanqaadaa inaad la xidhiidho asaagaa si joogta ah, gaar ahaan marka aad dareento dib u gurasho inay soo fool leedahay, waxana aad had iyo jeer xusuusnaataa

Haddii aad wax baran karto, waxaasi waad fulin kartaa

**Tusaha Xubnaha  
Degaanka ee  
Adeegsiga  
barashada**

**Taxanaha  
Agabka Tababarka**



**Tusaha Xubnaha  
Degaanka ee  
Adeegsiga  
barashada**

**Taxanaha  
Agabka Tababarka**

## **Qaybta 2aad: Buug-hawleed**

**Tusaha Xubnaha  
Degaanka ee  
Adeegsiga  
barashada**

## **Xubinta Golaha iyo Adeegsiga wixii la baray**

**Taxanaha  
Agabka Tababarka**

Waxa buugan shaqo loo qorsheeyay in uu kaa caawiyo sidii aad u fulin lahayd cilmigii iyo xirfaddii aad ka heshay mid kasta oo ka mid ah fadhiyadii taxanaha ahaa ee tababarka hogaanka la soo doortay. Dhamaan waxyaalaha ku xusan buugga waa la sawiran karaa. Buuggan shaqo dhamaantii wada sawiro oo u sii qaado fadhi kasta oo waxbarsho oo aad ka qaybgalayso waxa aanad isticmaashaa waxyaalaha ku saabsan fulinta waxbarashada sida ay tilmaamaha lagu siiyay sheegayaan.

Sida aad arki doonto, qalabka buugan waxbarasho wuxuu u nidaamsanyahay saddex qaybood oo u dhigma sadexda qaybood ee ay ka koobantahay fulinta waxbarasho ee lagaga dooday qoraal xagga hoose lagu xusay.

1. Qaybta koowaad waa qalab loogu magac daray “Waydiimo lagu qiimaynayo qofka wax Qabadkiisa”. Waydiimahan waxa la rabaa in aad buux-buuxiso inta aanad ka qaybqaadan fadhiyada taxanaha tababarka hogaanka la soo doortay. Jawaabaha aad su’aalaha ka bixisana adiga ayaa si gaar ah u isticmaalaya. Waxaana ay kaa caawinayaan in aad qiimayso mustawaha adeega kaalin( door) kasta oo aad qabato oo ku saabsan hogaanka la soo doortay. Macluumaadka aad halkan ka hesho waxa ay kaa caawinayaan inaad go’aan qaadata oo aad doorato fadhiga waxbarasho ee taxanaha ka mid ah ee aad ka qayb qaadanayso iyo halka uu fadhigaasi ka galayo taxanaha ( adaa kala hor-horaysiinaya fadhiyada kolba baahidaadu sida ay tahay).
2. Qaybta labaad : Waxa ay ka koobantahay foomam iyo tilmaamo ku saabsan qalabka aad isticmaalayso fadhi kasta oo waxbarasho. Qalabkaasina waxa uu kugu dhalinayaa in aad ka fikirto noqoshadaada, sida aad u fulinayso waxa aad soo baratay. Waxana ku dhex jira tusaalooyin kaa caawinaya in aad u ururiso fikradahaaga si tayo leh marka aad dhamayso qalabkan. Waxana ku dhex jira foom aad ku ururinayso ujeedooyinka fadhiga waxbarasho iyo tiro waraaqo shaqo ah oo loogu tala galay in aad si gaar ah ugu qoroto wax kasta oo tababarka ku saabsan oo qiimo leh oo aad doonayso in mustaqbalka aad dib u eegto. Waxa kale oo ku jira ra’yiyo la soo jeedinayo si ay kaaga caawiyaan in aad la shaqayso mid kale oo ka qaybgalayaasha fadhiga waxbarashada ah si aad uga fikirtaan una qorshaysaan idinka oo wada jira sidii aad u fulin lahaydeen cilmiga iyo xirfadaha cusub ee aad korodhsateen. Waxa taa dheer “waraaqo shaqo oo ku saabsan fulinta waxbarashada”. Waraaqahan shaqada marka la buuxiyo waxa ay kuu noqonayaan qorshe shaqo oo aad ku isticmaasho waxaad ka baratay fadhiyada waxbarasho si aad hore ugu mariso adeega golahaaga.
3. Qaybta saddexaad: Waa kayd muhiim ah oo la isticmaalayo marka la dhamaysto fadhi kasta oo waxbarasho “Taxanaha hogaanka la soo doortay” ah. Qaybtana waa ka mid waxbarashada qaybaheeda oo waxaad is arkaysaa adoo shaqadaadii ku noqday oo kaa horyimaadeen cidhiidhiyadii shaqadu, oo lagugu kalifayo in badan in aad ka tagto qorshihii fulinta waxaad soo baraatay. Waanu ognahay in aanad jeclayn in tani dhacdo, sidaa darteed waxa aanu ku siinay talooyin aad iskaga jirayso dib inaad ugu laabato caadooyinkii hore.  
Qaybta saddexaad waxa ku jira waraaq shaqo oo ku siinaysa dariiqo ku raali galisa

**Tusaha Xubnaha  
Degaanka ee  
Adeegsiga  
barashada**

**Taxanaha  
Agabka Tababarka**

oo aad ku qoroto natiijooyinkii ka dhashay awoodii aad ku bixisay fulinta wixii aad fadhiga ku soo baratay. Waxana lagu baneeyay meel aad ku qortid sida aad u fulinayso waxaad soo baratay. Iyada oo aanu rajaynayno in aad macluumaadkan la wadaagi doonto ka qaybgalayaasha fadhiyada kale ee lagu tababarayo hogaanka la soo doortay ee aad ka soo qayb galayso.

**Tusaha Xubnaha  
Degaanka ee  
Adeegsiga  
barashada**

**Taxanaha  
Agabka Tababarka**

## **Xubinta 1aad. Qoraalka Tababaraha**

Waxyaalaha lagu xusay buugani waxa ay dhamaystirayaan kuwa ku qoran “Taxanaha hogaanka la soo doortay”. Haddii aad ahayd Tababare waxoogaa, waad haysaa in xagga fulinta faraq u dhexeeyo goobta fadhiga waxbarashada iyo goobta shaqada. Waxa buugan loogu soo daray taxanaha si layskugu dayo in la daboolo ama la yareeyo faraqaa jira marka qofka xubinta golaha ihi uu qaato mid ama in ka badan oo taxanaha hogaanka la soo doortay ah. Qofkuna wuu fulin karaa sidan, haddii uu xoojiyo gartana qiimaha uu leeyahay waxa aynu ugu yeedhnay “ Qorshihii laabashada”. Xilliga ugu wanaagsan ee aad arinkan ku dhaqaaqaysaa waxa weeye bilowga fadhiga waxbarasho, marka aad ujeedooyinka fadhiga waxbarasho la eegayso ka qaybgalayaasha. Ka qaybgalayaasha hore uga qaybqaatay taxanahan waxbarasho waxa ay qaadan doonaan sawir buugan ah waanay qoran sida loo isticmaalayo. Ka qaybgalayaasha markii ugu horaysay ka qayb qaadanayaa iyagu umay baran arimahan, waxana ay kaaga baahanyihiin dhiiri galin sidii ay u isticmaali lahaayeen.

Waa in aad hubisaa in aad sidato sawiro madhan oo sadexda qaybood ee buugan shaqo ah, oo aad ugu talo galayso ka qaybgalayaasha laga yaabo inay iloobaan in buuga ay fadhiga waxbarasho u soo qaataan.

Akhri tilmaamaha si aad ka qaybgalayaasha ula dhamaystirto su’aalaha qiimaynta adeega qofka. Waxaad siisaa (10) daqiiqo si waydiimihii loo dhamaystiro. Markaa waxaad akhridaa su’aalihii dabagalka, waxa aanad hubsataa inay fahmayaan waxa laga rabo inay qabtaan inta aanay hawshan bilaabin. Waxa laga yaabaa in aad aragto in ka qaybgalayaasha qaar horeba uga jawaabeen su’aalahan. Haddii sidaasi jirto, waxaad ku tidhaa ku noqda natiijooyinkiina oo hubsada in uu jiro wax isbedel ihi inta ka qaybgalayaasha kale ee ay ku cusbyihiin su’aaluhu ay buux-buuxinayaan (su’aalahan). Haddii fadhigan waxbarasho uu yahay ka la yidhaa “fikrad ka qaadashada Tababarka madaxda la soo doortay”, waxaad arki in buugga tilmaan bixiyaha ah ee koowaad ee taxanahaasi iyo buugani aad iskugu dhawyihiin xagga Tababarada qiimaynta. Kol haddii loogu talo galay labada tababarba in ay caawiyaan in ka qaybgalayaashu ay Itixaamaan ( Baadhaan) halka ay ka jilicsanyihiin ama xoogga ku leeyihiin, waxaad kartaa in kaad doonto labadooda aad isticmaasho.

Marka ay dhameeyaan su’aalaha iyo baadhitaanka la socda waxa aad waydiisaa ka qaybgalayaasha in ay liis gareeyaan laba ama saddex ujeedooyinkooda muhiimka ah ee waxbarasho ee ku saabsan ka qaybgalkooda fadhigan waxbarasho. Waxaad u soo jeedisaa in ay dib u eegaan meelaha adeeg horumarineed ee maskaxda ay ku qabteen markii ay baadhayeen macluumaadka ay ka heleen su’aalihii qiimaynta adeegga. Waxaad waydiisaa waxa ay ku qanci karaan ee tusaya in natiijooyinkoodu sax yihiin. Sii (10)daqiiqo si ay arinkan uga jawaabaan. Markaa waxaad waydiisaa yaa ka qaybgalayaasha is xilqaamaya oo kala doodaya waxa uu qoray ka qaybgalayaasha kale. Ku dhiiri ka qaybgalayaasha in ay dib u eegaan guushooda xagga natiijooyinka marka fadhiga waxbarasho dhamaado. Waana in aad maayarka iyo xubnaha golaha kala doodaa qorshayaasha ay ka qaybgalayaashu adeega ku horumarinayaan.

**Tusaha Xubnaha  
Degaanka ee  
Adeegsiga  
barashada**

**Taxanaha  
Agabka Tababarka**

Waxa intaa dheer, waxa aanu qorshaynay hab lagu hubinayo socodka isticmaalka qalabka fulinta waxbarashada iyo in la siiyo ka qaybgalayaasha waxyaalo dhiiri galinaya si ay ugu talaabsadaan fulinta aqoonta iyo xirfada cusub.

Bilowga fadhigan, taageero ayaad gaysan kartaa, adoo waydiinaya ka qaybgalayaasha cid hore uga qayb qaadatay taxanahan waxbarasho, si uu khibradiisa ula wadaago qofba qofka kale isaga oo fulinaya wixii uu bartay,

Isticmaalayana macluumaadka “qoraaladii fulinta wixii la so bartay” (eeg qaybta 2aad) laga soo ururiyay. Waa in qof kasta la waydiiyaa khibradiisa iyo fikradiisa, su’aalana la is way-waydiiyaa. Nusa saace lagu qaato dib u eegida khibradihii ayaa ku filan, iyada oo lagu darayo xusuusin loo sheegayo ka qaybgalayaasha uu fadhigani ugu horeeyay, in fadhiyada dambe ee taxanahan la damacsanyahay inay sidan oo kale u bilowdaan.

**Tusaha Xubnaha  
Degaanka ee  
Adeegsiga  
barashada**

**Taxanaha  
Agabka Tababarka**

## Waydiimaha qiimayneed ee hawl-galka qofeed



Magaca: \_\_\_\_\_

Golaha: \_\_\_\_\_

Fadhiga waxbarasho: \_\_\_\_\_

Waxa aad u dhawdahay inaad talaabo qaado si aan qiyaas lahayn u xoojinaysa faa iidada aad ka helayso fadhigan iyo fadhiyada kale ee hay'adda UNCHS (Habitat) ee “Taxanaha tababarka hogaanka la soo doortay”. Si loo helo natiijo wanaagsan buuxi su'aalahan inta aanad fadhigaaga waxbarasho ee u horeeya ka qayb galin. Waxaad ku buuxin kartaa su'aalahan iyo baadhitaanada la socda gurigaaga, haddii kale waxaad kaashan kartaa Tababaraha marka uu bilaabmayo barnaamijka u horeeya ee aad ka qayb galkiisa ku qoran tahay.

**Tusaha Xubnaha  
Degaanka ee  
Adeegsiga  
barashada**

**Taxanaha  
Agabka Tababarka**

## Waydiimo lagu qiimaynayo adeega qofka

Waxa aanu soo jeedinaynaa inaad buuxiso su'aalahaan ka hor inta aanad ka qayb galin midna fadhiyada waxbarasho ee hay'adda UNCHS (Habitat) oo ah taxane loogu tala galay Tababarka hogaanka la soo doortay. Warka ka dhasha waydiimaha ee ku saabsan adeegaaga xubin golenimo ee la xidhiidha doorar kala duwan waxa ay kuu tahay wax tar si aad u go'aansato midka aad ka qayb galayso (11)ka fadhi ee waxbarasho iyo goorta aad mid kasta ka dhignayso. Haddii aanay waydiimuhu ku soo gaadhin intii aanad iman mid ka mid ah fadhiyada waxbarasho, wali waxa kuugu jira warka aad hesho waxtar aad ku go'aan qaadata fadhiyada taxanaha ah ee soo socda. Tababaraha ayaa kugu hagi habka loo buuxinayo su'aalaha ee looga midha dhalinayo.

### Tilmaamo

Waydiimuhu waxa ay liis garaynayaan ( 11)ka door ee taxanaha waxbarasho ee hogaanka la soo doortay uu ka koobanyahay iyo khaanado ka kooban sadexda jawaabood ee suurta galka ah. "Aad u fiican, dhex-dhexaad, liita". Door kasta sharax ayaa laga bixiyay. Waxa aad ka bilowdaa akhriga doorka ugu horeeya, markaa ku samee isku talaab(x) khaanad ka mid ah khaanadaha ka soo horjeeda ee ku haboon doorka aad ugu haboon adeegaaga imika. Waad wadaysaa ilaa aad (11)ka door ee adeegaaga imika ku saabsanba aad ka dhamaynayso.

**Tusaha Xubnaha  
Degaanka ee  
Adeegsiga  
barashada**

**Taxanaha  
Agabka Tababarka**

	Doorka iyo sharaxiisii			adeega imika		
